



Sheegista sheekooyin - haddii ay noqoto kuwo dhab ah ama khayaali ah - waa hab xiiso leh oo lala xiriirta ilmahaaga.

Si wadajirah, waxaad u soo xusuusan kartaan dhacdooyinka dhabta ah ee ku saabsan nololaha qoyskaaga. Qof kasta wuxuu ku raaxaysan karaa kasheekaynta sheekada sida ay u xusuustaan. Waxaad sidoo kale u sheegi kartaa sheekooyinka markaad ilmo ahaan jirtay ama waxaad ka sheekeyn kartaa sheekooyin dhaqameed ee dhaqankaaga ku saabsan si aad u gudbiso casharo muhiim ah oo nololaha oo waxaad siisaa canugaaga dareen oo ka mid ahaansho.

Sheeko sheegida waxay noqon karaa mid cajiib ah. Sheekooyinka waxay ka caawiyaan ilmahaaga inuu noqdo mid hal abuur leh oo wax qiyaasi karo ah oo uu ku fahamo adduunka ku hareersan. Xitaa waxaa ay yihiin hab fiican oo lagu yareyn karo welwelka iyo laga caawin karo ilmaha inay dareemaan si farxad oo isbedel nololeed leh. Ugu dambeyntii, sheekooyinka waa hab aad awood u leh oo ka caawisa in ilmahaaga uu wax fahmo oo uu ku hadlo afkaada hooyo -tani waxayna ka caawineysaa inay bartaan luuqado cusub!

Talooyin ku saabsan Sheegista sheekooyin:

- Isticmaal luqad fasiix ah oo fudud.
- Ku celceli waxa cunugaaga uu yiraahdo, si canugaada u arko inaad fahantay.
- Ka caawi cunugaagu inuu barto erayo iyo fikrado cusub.
- Kal sheekeey dadka, meelaha iyo waxyaabaha caanka ah.
- Ka caawi cunugaagu inuu barto erayo iyo fikrado cusub.
- Fursad sii cunugaaga inuu wax ka hadlo waxyaalaha nafsad ahaantooda micnaha u leh.
- Su'aalo weydii oo haddana ka jawaab su'aalaha.
- Dhageeyso oo iskula hadla afkaada hooyo.
- Dib-ugu-sheekay sheekada cunuggaaga uu jecel yahay.
- Ku raaxayso ku sheegida sheekooyinka afkaada hooyo markasta oo ay macquul tahay.

Sheeko Sheegista waxay dhistaa xirfadaha luqadda.

Cilmi baaris ayaa waxay muujinaysa ka sheekaynta dhacdooyinka qoyska, caadooyinka iyo dareenka afkaada hooyo waxay noqon kartaa mid aad waxtar ulahan karto koriinka ilmahaaga. Waxaan sidoo kale ognahay in waqtiga ugu muhiimsan ee horumarinta xirfadaha luqadeed waa marka ilmahaagu uu jiro eber illaa saddex sano jir. Tani waa marka ay maskaxdoodu diyaar u tahay inay sameyso xiriirka luqadda. Ereyada badan ee ilmuhu uu maqlo wakhtiyadaan, ereyada badan ay si dhakhsi ah u fahmi doonaan oo ayna baran karaan. Ereyada badan ay yaqaanaan oo ayna isticmaalaan, inta ay u badan tahay inay noqdaan kuwa akhriska ku fiican. Yeelashada awood aad ku dhageysatid iyo aad kula hadashid, ee luqad kasta, ayaa ah xirfad aasaasiga ah ee u diraa ahaanshada dugsiga.

Sheeko ku sheegida afkaaga hooyo.

Hadalka, dhageysiga iyo ku sheegida sheekooyinka afkaaga hooyo waxay bixisa asaaska xoogan ee wax barashada luuqad labaad. La isticmaal canugaaga afkaaga hooyo. Waxay ka caawineysaa inay dareemaan inay aad isugu xirantihiin adiga iyo qoyska intiisa kale. Waxay u badan tahay inay sii koraan iyagoo ku faanaya luqadooda iyo dhaqankooda. Waan ognahay in aasaaska xoogan ee afkaaga hooyo ayaa ilmahaaga u sahli karaa barashada luuqada Ingiriisiga.

Waxaa sidoo kale lagu talinayaa in waalidku aysan isku qasin luuqadaha ama joojiyaan afkaaga hooyo. Sii wada hadalka, sheegida sheekooyinka iyo ku hadalka afkaaga hooyo si aad u sii noolayso oo aad u adkeyso. Tani waxay cunugaada ka caawineysaa inuu si dhaqso ku barto luqada labaad oo si wanaagsan ah.

Sheekooyin ku sheegida afkaada hooyo iyo waqtiga aad ku qaadata dhageysiga sheekooyinka ilmahaaga waxay ka caawisaa siyaabo badan:

- Waxay dareemayaan inay muhiim yihiin, in la dhegeysanaayo oo la qiimeeynaayo.
- Waxay dareemaan Inay aad adiga kugu dhow yihiin markii lagu dhiirigeliyo inay la wadaagaan fikradooda iyo dareenkooda.
- Waxay noqon doonaan kuwo aad u xiiseeya buugaagta.
- Waxay baran karaan erayo badan iyo fikrado badan oo cuseeb oo afkaaga ah.
- Waxay lagu dhiirigelinaysaa inay kula hadlaan afkaaga hooyo.
- Ilmahaagu wuxuu baran doonaa in uu soo xasuusto dhacdooyinka, inuu sheekooyin sheego, doorashooyin samaysto iyo inuu ka hadlo waxkasta oo ay qabanayaan.
- Waxay baran doonaan in ay aqoonsadaan dhawaaqyada soo noqnoqda oo waxayna bilaabayaan in ay tilmaamaan erayada. (Tani waa bilowga barashada akhriska.)

Fikradda Hawlaha: Canugaaga la sameey Buug sheeko ah

- Waxaad isticmaali kartaa sawirrada ilmahaaga ama sawirada si aad sheeko ugu sameyso.
- Kala hadal cunugaaga wixii ku saabsan sawiradooda ama sheekada qoyska ay jeclaan lahaayeen in ay ka sameeyaan buug.
- Ku dhiiri geli ilmahaaga inuu kuu sheego ereyada loo isticmaalo sheekada afkaada hooyo.
- Ku qor erayadan afkaaga hooyo.

Booqo cmascanada.ca/cnc/parents wixii macluumaad dheeraad ah oo waalidiinta laba luuqadlaha ah



SUPPORTING CHILD CARE IN THE SETTLEMENT COMMUNITY / SOUTIEN DE LA GARDE DES ENFANTS DANS LA COMMUNAUTÉ DE RÈGLEMENT

Funded by: Immigration, Refugees and Citizenship Canada / Financé par : Immigration, Réfugiés et Citoyenneté Canada